SANAD

Taxanaha taxriifka iyo sheegashada




**Ifafaalaha gaalaysiinta muslimiinta oo lagu gaalaysiiyo khilaafyada sharciga Muslinka muslinka kale inuu ku dhaho .**
**"Gaalyahow! "!!!**

**Soosaariidda**
**2**

**Magaca Alle ayaan kubillaabayaa ee naxariis guud iyo mid gaarba naxariista**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamkoo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato midka ugu sharaf badnaa anbiyaha iyo rususha sayidkeena iyo nabigeena Muxamed aaminka ah iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaantooda.

## Ifafaale degdeg ah: leexashada fikirka

Waqtiyadan dambe waxaa ku dhex faafay muslimiinta ifafaalaha gaalysiinta, in badanna way fududaysteen ilaa uu ka noqdo maqlitaanka dhawaaqa "Gaalyajow" mid caadi ka ah dadka agtooda, fududaysigan wuxuu keenay faafidda fidnada iyo ku dhiirrashada daadinta dhiigga iyo ku xadgudubka sharafta iyo ku caasiyidda waalidiinta iyo gooynta qaraabada, waxay bilaabeen inay is dagaallaan iyagoo ku marmarsiyoonaya marka hore in la saxo caqiidada islaamka, taasna wax kale sabab uma aha oon ahayn umminimada xagga diinta iyo jahliga xagga islaamka saxa ah.

S. Ma bannaan tahay muslinka inuu muslinka ku dhaho gaalyahow?

**Taas ma bannaana**

Sababtana waa oraahda rasuulka SCW (Qof kastoo ku dhaho walaalkiisa: gaalyahow, midkooda ayaa la laabanaya, hadduu yahay siduu yiri, haddii kalana isagay kusoo noqonaysaa)[1]



iyo oraahdiisa (SCW) ku sugan wixii uu ka wariyay Abuu Thar (RC):
(Qofkii qof gaalnimo ugu yeera ama dhaho cadowgii allow asoona sidaas ahayn way kusoo noqonaysaa) macnaha way kusoo noqonaysaa waxaa laga wadaa gaalnimada.
iyo oraahdiisa ku sugan wixii uu ka wariyay Abuu Saciid Alkhudri:
(Qof ma gaalaysiiyo qof kale waligii hadday dhacdo midkooda ayaa la laabanaya hadduu gaal yahay haddii kalana wuxuu ku gaaloobayaa gaalaysiintiisa)[2]

1- Bukhaari iyi Muslin ayaa wariyay
2 - Bukhaari iyi Muslin ayaa wariyay

# Suuraysi qaldan - fahan qaldan

Laakin so ka mid ma aha muslimiinta kuwo lagu gaalaysiinayo dhaqankooda?



Qof kastoo qira in Ilaah kale jirin Alle mooyee nabi Muxammadna inuu yahay rasuulkiisa kuna farxo wanaagga oona dhibsada xumaanta waa mu'min, waxaa laga wariyay amiirka mu'miniinta Cumar bin Alkhadaab (RC) inuu yiri: rasuulkii Alle ayaa yiri: (qofkii wanaaggiisa uu farxadgaliso xumaantiisana ay dhibto, waa mu'min)[1]
"muxuu u ogaan waayay qofkii ku dhahayo walaakiisa: gaalyahow, asoo ah qofkii uu wanaaggiisa farxadgaliyo xumaantiisana ay dhibto, in la gaalaysiiyo maxay uga mudan tahay in imaan loo qiro"[2]
Xadiiska Al-acmash uu ka wariyay Abuu Sufyaan, wuxuu yiri: Jaabir (RC) ayaan ku iri: miyaad ku dhihi jirteen qofka ka mid ah ahlu qiblaha gaal? wuxuu yiri: maya, waxaan iri: mushrikna? wuxuu yiri: Allaan ka magangalay; wuuna naxay" [3]

Laakin Alle wuxuu yir: (qofkii aan ku xukumin wixii Alle soo dejiyay kuwaas waa gaalo), marka madaxda oo dhan aan shareecada dabaqin waa gaalo, sidoo kale qofkii raalli ku noqday xukunkooda oo ka mid ah shacabka, so sidaas ma aha?

## Maya

, sax ma aha maxaayeelay saxaabada iyo taabiciinta iyo culimada badankooda gaalnimada halkan waxay ku fasireen inay tahay gaalnimo ka sokow gaalnimo, taasoo laga wado dambi weyn, laakin qofkii sameeya islaamka kama baxayo.

Yaa yiri gaalnimo ka sokow gaalnimo



Waxaa yiri Ibnu Cabbaas iyo Xudeyfa iyo Daawuus iyo Mujaahid iyo Axmed bin Xambal iyo Ibnu Cabdilbar iyo mufasiriinta badankooda sida Ibnu Jariir iyo Fakhr Arraazi iyo Albaghawi, iyo Alkhaazin iyo Alqurdubi iyo kuwa kale [4].

Qofkii ku celcelinaya taas wuxuu qabaa caqiiqada khawaarijta ee ma aha caqiidada Alhlusunnaha.

Sidey ugu celcelinayaan wadaaddada qaar inay yihiin kuwa aan ku xumin wixii Alle soo jiyay gaalo?

wuxuu ku yiri imaam Alqurdubi Al-mufhim: oraahda Alle: (qofkii aan ku xukumin wixii Alle soo dejiyay kuwaas waa gaalo) daahirkeeda waxaa daliilsada dadka ku gaalaysiiya dambiyada waana khawaarijta, daliilna uguma sugna .[5]

Wuxuu ku yiri imaam Alsamcaani tafsiirkiisa: "ogow khawaarijta inay u daliilsadaan aayaddan qofkii aan ku xukumin wixii Alle soo dejiyay inuu gaal yahay, Ahlusunnana waxay dhaheen laguma gaaloobo katagidda xukunka .[6]

1- Ibnu Xibbaan ayaa ku wariyay saxiixiisa, kitaab al-iimaan.
2- Ibnu Cabdilbar, Attmhiid, baab alcayn, juska toddoba iyo tobnaad (17/15-22)
3- Raadraac hore, waxaana wariyay Abuu Yaclaa iyo Dabaraani oo ku wariyay kabiirkiisa raggana waa ragga saxiixa siduu kusoo arooriyay Alhaythami majmac al-zawaa'id.
4-xaashidii hore ayaa lagu faahfaahiyay
5- Almufhim limaa ashkala min talkhiis Muslim, Abulcabbaas Axmed Alqurdubi 2/116
6- Tafsiir imaam alsamcaani 2/42

# Male iyo qaladaad ducaadda qaar ay aaminsan yihiin



Ma ku jiraa muslimiinta qof Alle la wadaajinaya shirki weyn oo islaamka ka saaraya?

Ma jiro qof ka mid ah muslimiinta oo Alle la wadaajinaya shirki weyn oo islaamka ka saaraya

Maxaa daliil u ah taas?

Taas waxaa daliil u ah oraahda rasuulka (SCW) uu wariyay Cuqba bin Caamir (RC): (wallaahi idinkaga baqi maayo inay gadaashayda shirki samaysaan , laakin waxaan idinkaga baqayaa inaad ku tartantaan (adduunka))

Waxay sugeen umadda in looga baqo ku tartanka adduunka oo keenaya halaaggeeda, way reebeen in guud ahaan shirkiga weyn looga baqo, siduu sheegay macsuumka Muaxamed (SCW), taasna waxaa ka mid ah oraahda imaam ibnu Cabdilbar uu ku yiri attamhiid: "qofkii uga baqo umadda Muxammad wax uuna uga baqin nabigeeda wuxuu la yimid qardajeex wax aan qarsoonayn"[7]

Maxay ka fahmeen culimada hadalka nabawiga?



Laakin nabiga (SCW) so kuma oran xadiiskii uu wariyay Muslim: (habeenka iyo maalinta ma tagayaan ilaa laga caabudo Laata iyo Cuzaa)?

Haa xadiiska waa saxiix, laakin wuxuu leeyahay dhammaystir ay qarinayaan dadka u daliilsada inay muslimiinta shirki ku tuhumaan waxayna ka mid tahay -annagoo ka xun" khiyaanada cilmiga

Caqligal miyaa taas?! waa maxay dhammaystirka?

Caa'isho waxay tiri waxaan maqlay rasuulkii Alle oo oranaya: (habeenka iyo maalinta ma tagayaan ilaa laga caabudo Laata iyo Cuzaa), waxaan iri: rasuulkii allow waxaan u malaynayay markii lasoo dejiyay (Eebe waa kan ku diray rasuulkiisa hanuun iyo diin xaqa inuu ka kor mariyo diimaha dhammaan haba naceen mushrikiinta)[8] in taas ay dhammaystiran tahay, wuxuu yiri: (way ahaan doontaa taas intii Alle doono kaddib wuxuu soo dirayaa dabayl fiican waxay oofsanaysaa qof kaste qalbigiisa wax yar iimaan ku jiro, waxaa soo haraya dad aan khayr lahayn waxay u noqonayaan diinta aabbeyaashooda)[9]

7- Bukhaari iyi Muslin ayaa wariyay
8- Attowba: 33
9- Muslin ayaa saxixiisa ku wariyay

Halkan waxaa ka cad cabuudidda Laata iyo Cuzaa waana sanamyada la caabudi jiray jaahiliyada inaysan soo noqonaynin markii Alle oofsado mooyee dhammaan mu'miniinta oo dhan aakhir samaanka marka ay soo baxaan calaamooyinka saacadda ee waaweyn, taasna waqtigeena ma dhicin iimaakana fadliga Ilaahay dartii wali wuu jiraa.

## Qalad laga aaminsan yahay muslimiinta

Laakin qubuuriyiinta ku dhawaafa qubuuraha oo weyneeya so mushrikiin ma aha?

Dhawaafka qubuuraha waa xaaraan ee shirki ma aha, maxaayeelay shirkiga waa inuu niyastaa kan dhawaafaya cibaadada qofka qabriga ku jira, taasna ma laha, wuxuu niyaysanayaa inuu Alle ugu dhowaado dhawaafka qabriga taasna waa xaaraan maxaayeelay Alle dhawaafka kacbada ayuu noo jideeyay ee nooma jidaynin dhawaafka qabriga.

Laakin mushrikiinta so ma dhihi jirin isla hadalkaas (uma caabudno inay Eebe noo dhaweeyaan mooyee dhawaansho) [Alzumar: 3] kuwa ku dhawaafaya qubuuraha waxay ugu dhowaanayaan Alle sida kuwaas mushrikiinta oo kale?

Maya, fariga u dhexeeya waa weyn yahay, maxaayeelay mushrikiinta waxay qirsan yihiin inay sanamyada caabudayaan si ay Alle ugu dhoweeyaan, laakin jaahiliinta muslimiinta ma aaminsana inay caabudayaan (dadka qubuurta ku jira), farqiga halkan waa cad yahay ee u dhexeeya labada qolo.
In lagu dul wareegto shay ma aha in la caabudayo shaygaas, annaga kacbada ayaannu ku dhawaafnaa dhawaafkeenana ma aha cibaado iyada u sugan bal Alle ayay u sugan tahay.
Sidaas oo kale dadka ku dhawaafa qubuuraha ma caabudayaan, laakin waxay samaynayaan dambiga bidcada dhawaafka qubuuraha Allana ma farin dhawaafkaas saan horay usoo sheegnay.

Ma jiraa daliil kale tusaya inaysan u soo noqonaynin muslimiinta cibaadada Alle qofaan ahayn?




Haa waxaa jira dhowr daliil waxaa ka mid ah xadiis laga wariyay Jaabir bin Cabullaahi (RC) wuxuu yiri: waxaan maqlay nabiga (SCW) oo yiri: (Shaydaanka wuxuu ka quustay inay ku caabudaan kuwa tukanaya jasiiradda carabta laakin wuu isku dirayaa)[10]


Iyo wixii laga wariyay ibnu Mascuud (RC) wuxuu yiri, rasuulkii Alle (SCW) ayaa yiri: (Ibliis wuxuu ka quustay in lagu caabudo dhulka carabta sanamyo, laakin wuxuu idinkaga raalli noqonayaa wixii taas kasoo haray waxyaalaha la yaso oo camalkiina ka mid ah waana kuwa halaagga keena)[11]

10- Muslin ayaa saxiixiisa ku wariyay
11- Xaakim ayaa ku wariyay mustadrak Dahabina wuu ku raacay

Kuwan waxay ku sugan yihiin baadi iyo qalad, wuxuu inooga digay nabiga (SCW) 1400 sano in ka badan kahor waxaad mooddaa asoo na dhex jooga!

Waxaa laga wariyay Xudeyfa (RC) wuxuu yiri: rasuulkii Alle ayaa yiri: (waxa aan idinakga cabsanayo waa nin quraanka akhriyay ilaa laga arko farxaddiisa islaamkana difaac u ahaa, wuxuu u dooray wixii Alle doono wuuna ka siibtay, wuxuuna ku riday gadaashiisa, dersikiisa seef ayuu u qaatay, wuxuuna ku tuuray shirki), wuxuu yiri: waxaan iri: nabigii Allow yaa shirkiga mudan kan lagu tuuray mise kan ku tuuray? wuxuu yiri: (kan tuuray)[12]






Haa, qofkii arrintaas sameeeyo halis weyn ayuu ku jiraa waana dambiile oo dambi weyn galay dambigiisana waa dambiga sida qof dadkoo dhan dilay wuxuu yiri Alle:

(Waxaanu reer banii israa'iil ku xukunay qofka dila nafaan waxaba dilin ama dhulka fasaadin inuu la mid yahay qof dadka oo dhan dilay Waxay ula Timid Rasuuladanadii Xujooyin Markaas in Badan oo ka mida Intaas ka dib Dhulkay ku Xadgudbeen)[13]

Wuxuu yiri rasuulkii Alle (SCW): (in la caayo muslinka waa fisqi in lala dagaallamana waa gaalnimo)[14]

Alle ayaannu weyddiisanaynaa inuu naga ilaaliyo dambiga weyn ee gaalaysiinta iyo ku tuuridda muslimiinta shirkiga, iyo inuu reebo dhiigga muslimiinta iyo inuu hanuuniyo walaalaheena ku lumay gaalaysiinta muslimiinta gaalaysiinta waxay soo jiidday dil iyo qarxin, waxaan weyddiisanaynaa Alle inuu ummadda ka badbaadiyo fitnooyinka wixii muuqda iyo wixii qarsoonba, taasna asaa u leh taag iyo awood waana midka ugu naxariis badan kuwa naxariista.

12- Ibnu Xibbaan ayaa saxiixiisa ku wariyay (81) Bukhaarina taariikh alkabiir (2907) Bazaarna (2793).
13- (Almaa'ida: 32)
14 - Bukhaari iyo Muslin ayaa wariyay

# Sida saxa oo lagula dhaqmo qaladaadka muslimiin

kaba soo qaad haddaan oggolaano wixii aad soo arooriseen oo ah halista ay leedahay in muslimiinta sharki lagu tuuro taasoo sabab u ah falkan halista ah mid sax ah, taas miyaa laga wadaa culimada iyo ducaadda inay ka aammusaan khilaafidda sharciga iyo bidcooyinka xunxun oo ka jira bulshadaha islaamka?



Maya, waxaa lagama maarmaan ah inay culimada iyo ducaadda ay la yimaadaan waajibkooda xagga sixidda wixii khilaafsan shar-ciga iyadoo la eegayo waxa soo socda:

• In qaladka loo saxo si aayar ah taasna waa hadyiga nabiigeena iyo sayidkeena Muxammad (SCW)
• Ummadda duudduubkeda iyo qolooyinkeeda bari ayay ka tahay inay ku dhacdo galaanimo ama shirki weyn, wixii naska nabawiga kooban kusoo arooray mooyee.
• Waxaa laga rabaa qofka saxaya qaladaadka caamada inuu qalbigiisa ka bixiyo wax kaste malo xun ah xagga muslimiinta falalkooda iyo caqiidadooda iyo inuu ogaado ku dhiciddooda ay ku dhacayaan khilaafyada ma keenayso in lagu tuhumo gaalnimo ama shirki, haddii kale waanada wax ma tarayso natiijada la rabana ma keenayso.
• Waxaa waajib ku ah culimada inay tixgaliyaan tkhasusuka culuumta sharciga, caalimka xadiiska ma fatwoon karo hadduu-san ahayn faqiih, qofka fatwada soo guurinayana ma fuuli karo darbiga ijtihaadka hadduusan faqiih ahayn.
• Ducaadda aan fiqiga ku takhasusin aad ayaa loogu baahan yahay xagga usoo dhoweynta dhalinyarada dhinaca Alle, laakin ma aha kuwa fatwo bixiya.
• Gaalaysiinta waa xukun sharci oo qadaa ku dhisan muslinka diintiisa ku dadaalaya waxaa laga rabaa inuu ka digtoonaado inuu ku dhiirrado

# Taxanaha taxriifka iyo sheegashada

Wuxuu yiri rasuulka (SCW): (Cilmigan waxaa ka xambaaraya dad kaste kuwa lagu kalsoon yahay, waxay ka hufaan taxriifka kuwa xadgudba iyo sheegashada kuwa baadilka wata, iyo fasirka jaahiliinta)

Dadka qaar oo fikradaha qaldan xambaarsan hadalka Alle (SW) iyo hadalka nabigiisa (SCW) waxay u fahmeen qaab aan waafaqsanayn manhajka cilmiga oo laga dhexlay salafkii suubbanaa, mana la soconayo ujeeddooyinka iyo qiyamka sarsare ee waxyiga Alle.
waxay aadeen qaar aayadaha quraanka kariimka ka mid ah oo kusoo degay dadka aan muslinka ahayn waxay korka ka saareen muslimiinta, waxay qaateen aayado usoo arooray qaab istisnaa ah waxay kalasoo baxeen axkaam guud, waxay u taxriifiyeen hadalka Alle iyo axaadiista nabigiisa sharafta leh qaab keenaya inay sugnaato ama  ay ku (sameysanto) mafaahiim caqliga dadka muslimiinta oo aad u qaldan, oo ay ka dhasheen dhaqamo iyo falal aan xiriir la lahayn diinta islaamka ee toosan.
waxaan ku ogaanaynaa taxanahn wixii ay ku dhaceen dadka xambaarsan fikradahan qaldan oo ah taxriiifinta macnaha hadal Alle iyo hadalka rasuulkiisa, iyo baadinimada ay ka baadiyoobeen qaar ka mid ah axkaamta sharciga oo ayna qaateen mafaahim qaldan, taasoo ka dhigta inay noqdaan kuwa ka baxsan ujeeddada Alle iyo rasuulkiisa iyo fahanka salafka suubban.

DAR AL FAQIH
مؤسسة طابة
Tabah Foundation
www.tabahfoundation.org
مبادرة سند هي إحدى مبادرات مؤسسة طابة للأبحاث والاستشارات - مصر

www.sanad.network
facebook.com/sanadnetwork
twitter: @sanadnetwork
youtube.com/sanadnetwork
instagram.com/sanadnetwork